# Naftaada ka ilaali hargabka iyo nooc ka mid ah bakteeriyo keenta cudurro isku jirjira (pneumokocker)!

Qofka jira 65 sano ama ka weyn, ama qaba cudurro joogto ah aad ayuu ugu xanuunsan karaa hargabka iyo cudurka (pneumokocke) oo ah bakteeriyo keenta cudurro badan oo isku jira. Sidaa darteed ayaa lagugula talinayaa inaad is-tallaasho. Tallaalku waa bilaash.

Fayrasyada hargabku si joogto ah ayey isu beddelaan waxaana jira dhowr nooc oo kala duwan oo hargabyo ah. Sidaa awgeed waxaad u baahan tahay inaad iska tallaalsho hargabka sannad kasta si aad u hesho difaac.

(Pneumokocker) waa bakteeriyo badanaa keenta caabuqyo ku dhaca neef mareenka. . Mararka qaarkood waxay xitaa keeni kartaa caabuqyo halis ah sida xanuuno ku dhaca xuubka maskaxda iyo dhiigga oo sumooba. Tallaalka ka dhanka ah cuddurka (pneumokocker) wuxuu ku siinayaa difaac sannado badan.

Waxaa lagugula talinayaa inaad iska tallaasho labada cudur haddii mid ka mid ah kuwan soo socda ay sax yihiin:

- Waxaad dhalatay 1957 ama ka hor.
- Waxaad leedahay wadno xanuun.
- Waxaad qabtaa cudurka sambabada, sida KOL ama asmo.
- Waxaad qabtaa cudurka sonkorowga nooca 1aad ama nooca 2aad ee sonkorowga.
- Waxaa leedahay cudur sidaa daraadeed difaaca adkaysiga jirkaagu aad uyuu daciif u yahay ama waa lagu daaweeyaa.
- Waxa shaqadoodii gabay beerka iyo kelyaha oo waxaad leedahay cudur joogto ah.
- Waxaad leedahay miisaan aad u culus.
- Waxaad qabtaa cudur sistamka neerfayaasha oo saameeya neefsashadaada.
- Waxaad tahay qofka meelo badan naafo ka ah.

Hadaad tahay qof ka shaqeeya caafimaadka- iyo daryeelka jirooyinka ama daryeela dadka waayeelka ah, oo aad qaraabo tihiin qof difaaca adkaysiga jirkiisu uu aad u liito ama aad tahay qof uur leh oo ku jira usbuucii 12aad ee uurka waxa lagugula talinayaa tallaalka ka dhanka ah hargabka oo keliya.

Qofka oo aan lahayn beeryarada ama isticmaala qalabka maqalka (cochleaimplantat) waxaa lagula talinayaa inuu iska tallaalo bakteeriyada keenta caabuqyada ku dhaca neef mareenka oo kaliya (pneumokocker). .

## Ballan u qabso tallaalka

Ballan dhigitaal ah ka qabso xarun caafimaad ama rugta qaabbilaada tallaalka. Hadda kadib ma geleysid bogga 1177.se si aad ballan ugu qabsato, ee waxaad ballanta ka qabsan kartaa websayt caadiga ah.
Waxaad leenkyada oo dhan ka heleysaa
rugaha tallaalada ee ku qoran 1177.se/Sormland/influensavaccination. Qofka aan awoodin inuu ballan dhigitaal ah qabsado wuxuu wici karaa 016-10 40 44 si looga caawiyo ballan qabsashada.

Warbixin dheeraad ah ka akhri 1177.se

1177

Region Sörmland